
BILAWGA FARTA



WASAARADDA WAXBARASHADA

IYO BARBAARINTA

XAFIISKA MANAAHIJTA

167

BILAWGA FARTA

MARYAM WEHELIYE BARRE

WASAARADDA WAXBARASHADA
IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga belin Ogolaansho

Waxa lagu daabacay
Madbacadda Qaranka
Xamar 1973

HORDHAC

Buuggan oo loogu, talagalay inuu dadweynuhu qorista iyo akhriska ka barto, waxa la filayaa inuu kaalintiisa ka soo baxo. Waxa kaloo la filayaa in buuggani bedelo casharadii xafiiska haatan ka hor ka soo baxay ee fasalada dadweynuhu raaci jireen.

Habka buuggan loo qoray waa habka cusub ee waxbarashada lana yidhaahdo «Habka Erayada». Wuxuu buuggani ka kooban yahay saddex qaybood:

1) *Erayada oo lagu dhawaaqo, la higgaadiyo, erayada xarfaha ka kooban oo la kala qeexo oo mid loo barto (erayo cusub, xarfo cusub); xarfaha waaweyn. shibbaanayaasha iyo shaqalada oo la kala barto.*
2) *Higgaadda far Soomaaliga oo xidhiidh ah; weedho. dood iyo yeeris gaagaaban; sheekooyin gaagaaban, heeso, maamaaho iyo layli badan.*
3) *Sheekooyin dhaadheer, murti maahmaaho iyo gabayo.*

Si «Habka Erayada» loo garto, loona raaco waxa la diyaariyey buug ku magacaaban «Tusaalaha Baraha», kaasoo la filaayo barahu inuu ka helo tusaalooyin waxtar leh si dhibaatada dhigitaanka buuggan u yaraato hawshuna u fududaato.

Xafiiska Manaahijtu wuxuu mahad naq u velinayaa Jaalle Cabdulqaadir S. Cabdilaahi iyo Peter Schwoebel oo ka tirsan Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta oo gacan ka gaystay habka buugga loo qoray iyo Jaamac Garaaso oo ku darsaday laba sheeko oo kala ah: «Waa Yaab!» iyo «Shir jiir».

Waxa kale oo uu Xafiiskanu mahad naq u celinayaa Idiris Maxamuud Cabdillaahi iyo Cali Axmed Xuseen oo buugga sawiradda u sameeyey iyo Ismaciil Maxamed Sheekh iyo Cabdi Xirsi Qanyare oo qaraacay.

Maamulaha Xafiiska Manaahijta
Suleymaan Maxamuud Aadan


TUSMADA BUUGGA

Hordhac	Bogga	3
Dugsiga	»	7-11
Beerta	»	12-15
Biyaha	»	16-19
Xaafadda	»	20-23
Gaadiidka	»	24-26
Xoolaha	»	27-29
Yeeris	»	30
Alif Soomaaliga	»	31-35
Higgaadda	»	36-39
Weero	»	40-42
Dood	»	43
Waa yaab	»	44
Diiq iyo dawaco	»	45
Gaadiidka dhulka (Geela)	»	47
Qodobyada	»	49
Waxbarashada iyo aqoonta	»	50
Hees	»	51
Go'aan jiir	»	52
Yeeris	»	53

Qodobyada	Bogga	54
Wax badso wax beel bay leedahay . .	»	55
Xaliima iyo Sacdiya	»	56
Kala garo	»	57
Kala garo tilmaamaha	»	59
Soo noq noqashada xisaabta	»	62
Xaawa iyo nadaafadda guriga	»	63
Magacyada keli iyo koox	»	66
Laba nin oo beeraley ah	»	67
Talo libaax	»	69
Furin lala wada yaabay	»	71
Laba nacas	»	72
Barashada Far Soomaaliga (Gabay) .	»	74
Tuug tuug ma xado	»	75
Tixo Murti ah	»	77
Urur iyo iskaashad	»	78
Wiil iyo gabar	»	80
Maahmah murti ah	»	81
Halxiraalihii gabadha	»	83
Afar waraabe	»	84

CASHARKA KOWAAD

DUGSI



Dugsiga

dug - si - ga

d - u - g - s - i - a


dus - dud - dad

dag - gud - gad

sug - sag - sid - sig

Digniin Bare: Erayada kor ku qoran waxa laga abuuray xarfaha uu ka kooban yahay erayga «Dugsiga». Ardaydu waa inay qoraan, akhriyaanna.

DUGSIGA





Fasalka **f - l - k**


Ardayga **r - y**

erayadan qor, akhrina.


1) dugsiga fur;
2) fasalka gal;
3) ardayga yar arag.

Digniin Bare: Weedhaha kor ku qoran waxaa laga abuuray xarfaha ay ka kooban yihiin erayada «dugsiga, fasalka iyo ardayga». Ardaydu waa inay qoraan, akhriyaanna dhowr goor.

DUGSIGA



bare - sabuurad



kursi - miis

b - e uu

- m - ii

erayadan qor, akhrina:

bar - bad - bed - buur

bun - buul - buug

daf - ul - sur - il - af - far


lug - kuul - luul - nal - naag


rag - bal - qab - mar - mid

miir - miiq - iid - iib

fiid - dfin - diir

Digniin Bare: Barahu waa inuu si fican u kala sheegaa oo ugu dhawaaqaa shaqalada gaaban iyo kuwa dheer ee kor ku qoran sida: «u» iyo «uu», «i» iyo «ii».





buug - laabis **aa**

qalin - khad **q-n-kh**

erayadan qor, akhrinta:

ad, aad - aar - aan

aas - laan - baal

baad - baan - faas

qare - qumbe - qaad

qabo - khal - khasnad

khalfad

Digniin Bare: Barahu waa inuu si fiican u kala sheegaa oo ugu dhawaaqaa shaqalada gaaban iyo kuwa dheer ee kor ku qoran sida «a» iyo «aa».

DUGSIGA

Xarfaha aad baratay:


crayga	xarafka
dugsiga	d
	u
	g
	s
	i
	a
ardayga	r
	y
kursi - miis	m
	ii

crayga	xarafka
	f
fasalka	l
	k
	b
bare - sabuurad	e
	uu
laabis - buug	q
	n
qalin - khad	kh


L a y l i :

Arday waliba ha dhigo lix eray isagoo isticmaalaya xarfaha kor ku qoran.


CASHARKA LABAAD
BEER



beerta **ee - t**



cagaf - cagaf **C**




yaambo **O**


Digniin Bare: Barahu si fiican ha u kala sheego shaqalada gaaban iyo kuwa dheer sida: «e» iyo «ee».

Erayadan qor, akhrina:


1) beer fiican
2) yaambo yar
3) cagaf-cagaf cusub



sabuul - galley **ll**




haruur **h**



yaanyo iyo basal

Digniin Bare: Barahu si wacan ha u sheego xarafka «l» inuu labalaabmo «ll».

labalaabmo = weldoppium (volgen ii dan)






bakaar

cudbi









qare iyo qumbe _____ mafafaay iyo cambe

Erayadan akhri:

1) mafafaay macaan;
2) qumbe biyo leh;
3) cambe bislaaday.

XARFAHA CUSUB:


erayga	xarafka	erayga	xarafka
beerta	- ee t	yaambo	- o
cagaf-cagaf	c	sabuul - galley	- ll

Erayadan qor, akhrina:

geed - geeso - ceel - yeel - bag - tag
beer - taallo - tallaabo - hillaac - ballan

Layli:


Arday waliba ha dhigo toban eray isagoo isticmaalaya ereyada cusub oo kor ku qoran iyo kuwii hore ee uu soo bartay.




biyaha

webi iyo jeer


w - j





yaxaas **x**


Biyaha




dhaanka (dh)

Erayadan qor, akhrina:

1) Kani waa dhaan;
2) Waa webi jeer badan;
3) Waa ceel biyo macaan.



roobka oo



waa war biyo badan



durdur biyo macaan

XARFAHA CUSUB:

erayga	xarafka	erayga	xarafka
dhaanka	- dh	webi	- w
jeer	- j	roob	- OO
yaxaas	x -		


Erayadan qor, akhrina:

dhar, dhul, dhiil, war, jid,
oon, boodh, noodh, lax, xariir.


L a y l i :

Arday waliba ha dhigo toban eray isagoo isticmaalaya xarfihii hore iyo kuwa cusub ee kor ku qoran.


XAAFADDA



xaafadda - dd



mundul




aqal

Erayadan qor, akhrina:


1) taasi waa xaafad fog;
2) waa mundul cusub;
3) waa jid nal fiican.


Kani waa qalabka guriga






waa sariir iyo joodari








waa ashuun maran


waa salli iyo darin qurxoon






waa tib, mooye iyo masaf





waa idan iyo gambar



waa xaaqin



XARFAHA CUSUB:

erayga	xaraſka
xaafadda	- dd

Erayadan qor, akhrina:

haddii, badda, dad,
kubbadda, dameer


L a y l i :

Arday waliba ha dhigo shan eray oo leh xaraſka labalaabma «dd».


Digniin Bare: Barahu yuusan halmaamin inuu akhristo bogga 4aad ee buugga «tusaalaha baraha».

GAADIIDKA

Kani waa gaadiidka dhulka:



ratiga waa la rartaa




fatnurad cusub




baabuur jid toosan socda

Digniin Bare: Barahu waa inuu si wacan u sheegaa xoolaha reer miyiga gaadiidka u ah.

Kani waa gaadiidka badda:



kani waa maraab weyn oo sonkor sida




tani waa doon dekedda ku xiratay

Digniin Bare: Arday waliba ha sawiro dhowr goor gaadiidka dhulka iyo kan badda, magacyadoodana ha ku qoro.

GAADIIDKA

Kani waa gaadiidka cirka:




waa dayuurad caad dhex maraysa

Erayadan qor, akhrina:

1) markab ma raacday?
2) dayuurad weyn baa duushay.
3) waa rati dhaan ah.
4) dameerku gaadiidka ma ka mid yahay?

Digniin Bare: Barahu waa inuu hubsadaa in arday waliba ka warceliyo wixii weydiis ah.

XOOLAHA



lo'

lo'da ceelka gee




Erayo hamsa leh:

waa ri' aad u buuran

la' - da' - gu' - go' - la'aan - go'aan - go'an.


Digniin Bare: Barahu si fiican ha u sheego xarafka hamsada leh iyo erayada uu raaci karo.




waa maroodi geed

harkii taagan

waa faras caws cunaya





waa dameer xaabo sida

XARFAHA CUSUB

erayga	**xarafka**
lo'	**-** '

Weero hamsa leh qor, akhrina:

1) go'aan ayaa doodii laga gaaray;
2) beec go'an baa sonkortu leedahay;
3) gu' walba roob ayaa inoo da'a;
4) biyo la'aan beeri ma baxdo;
5) go' madow buu iibsaday.

L a y l i :

Qor shan eray oo hamsa leh iyo shan weero oo iyaguna hamsa leh.

4aad ee buugga «tusaalaha baraha».

YEERIS

Xaawo iyo Cabdi waxay wada joogaan dugsiga agtiisa, buuggag bay sitaan, far Soomaali ayay baranayaan oo akhrinayan.

Guuleed waa nin beeraley ah oo tacbada. Maanta isagoo yaambo sita, ayuu ka baxay guriga oo qabtay beertii, wuxuuna damacsan yahay inuu beerta si wacan u falo.

Caafimaadka qofka wuxuu ku xiran yahay, had waliba nadaafadda guriga uu seexdo, alaabta wax uu ku cuno iyo dharka uu qaato intaba.

Cali waa inan da' yar, hadana aad fiiro dheer u leh oo yaqaan asluubta jidadka loo maro.

Maxamed ayaa magaalada Marka ka ambabaxay; isagoo Jannale u jeeda. Wuxuu yiri «magaalada Marka martiqaad casho ayaa la iiga sameeyay; Jannalena waxaa la iga weydiistay inaan jiko ka shaqeeyo. Marka waa la iga jecelaa oo waa la iiga adeegi jiray; Jannalena waa la iiga baahnaa.

Hadal yar, hawl badan iyo hanuunsanaan

ALIF SOOMAALIGA

Kala baro xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar:

«Shibbaneyaasha»

b t j x kh
B T J X KH

bad b a d
BAD B A D

d dh r s sh
D DH R S SH

baabuur b a u r
BAABUUR BAUR

ALIF SOOMAALIGA

Kala baro xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar.

«Shibbaneyaasha»

	c	g	f	q	r
	C	G	F	Q	R
yaambo	y	a	m	b	o
YAAMBO	Y	A	M	B	O
	l	m	n	h	y
	L	M	N	H	Y
dhaandhaan	dh	a	n		
DHAANDHAAN	DH	A	N		

Digniin Bare: Barahu si wacan ha u sheego in xarafka weyn loo hor mariyo: (1) Weedha; (2) Magaca gaarka ah; (3) Boodhadhka (tabeelooyinka).

ALIF SOOMAALIGA

Shibbaneyaasha ka kooban summadda qur ah:

b t j x d r s c g f q
B T J X D R S C G F Q

k l m n w h y
K L M N W H Y

Shibbaneyaasha ka kooban labada summaddood:

dh sh kh
Dh Sh Kh

Erayo leh shibbaneyaasha labada summadood ka kooban. Dhar, dhir, dheer, dhaan, shaati, shaah, shanlo, shimbir, khad, khasnad, khudbo, naakhuude.

Layli: —

Arday waliba ha dhigo sagaal eray: Saddex leh xarfka labada summad ee «dh»; saddex xarafka «sh»; saddex «kh».

ALIF SOOMAALIGA

U fiirso oo baro xarfaha labalaabma

b d r g l m n
B D R G L M N

Erayo xarfaha labalaabma leh.

bb = gabbal — kubbad

dd = waddada — haddii — saddex

rr = carro — berri

gg = xoogga — xagga — togga

ll = hillaac — jaalle — taallo

mm = ammaan — dheemman — dhimman

nn = bannaan.

Digniin Bare: Barahu waa inuu si wanaagsan u sheegaa sida loogu dhawaaqo xarfaha labalaabma, isla markaana awood u siiyaa ardaydu inaay ka sameeyaan layli badan.

ALIF SOOMAALIGA

Baro shaqalada

Shaqalada gaaban

A E I O U

a e i o u

Shaqalada dheer

AA EE II OO UU

Aa Ee Ii Oo Uu

aa ee ii oo uu

Erayo shaqal gaaban leh:

af, afar, amar, eber, ergo, il, if, ari, ubax.

Erayo shaqal dheer leh:

Aar, aas, eeg, eebe, eebo, iid, iil, oon, oof, uur.

Higgaadda far Soomaaliga

1) Shibbane — shaqal gaaban — shibbane is raacsan (cod qur ah).

Bal — tan — yar — sar — can — far — mar — nal — qor

god — gad — cod — fur — lab — dhir — dir — hab — sac

wan — war — cun — sun — kun — bad — bil — bir — bed

wey — lug — hir — shan — dab — qol — kab — kal — mas

run — rag.

2) Shibbane baa ku lamaanaan kara «y» iyo «w».

Sayn — goyn — weyn — beyr — xayn — hayn — cayn

feynuus — hawl — dhowr.

L a y l i :

1) Qor shan eray shibbane iyo shaqal gaaban oo cod qudha leh.
2) Qor lix eray, saddex ku lamaanaan xarafka «y» saddexna xarafka **«w».**

Higgaadda far Soomaaliga

1) Shibbane iyo shaqal dheer is raacsan oo cod qudh leh.

Baal — haan — faar — goor — ceel — been — jeer — geed
jiir — miis — wiil — beul — luul — tuur — kool — suul
saan — saab — buur — baar — raad — seef — tiir — yeey
liin — laan — muus — dhuun — suun — goob — tiin — toon
roob.

2) Shaqal gaban iyo shibbane is raacsan oo cod qudh ah:
il — af — ib — in — ay — ul — il — ah.

3) Shaqal dheer iyo shibbane is raacsan.
uub — iib — oof — aan — ood — oon — eey — iin — aar
aad.

Layli:

1) Qor toban eray shibbane iyo shaqal dheer is raacsan oo cod qur ah leh.

2) Qor saddex eray shaqal gaaban iyo shibbane is raacsan oo cod qur ah leh.

3) Qor shan eray shaqal dheer iyo shibbane is raacsan oo cod qur ah leh.

Higgaadda far Soomaaliga

1) Baro eraya laba cod leh oo shaqal gaaban:

dabo — bare — fure — dabar — aqal — dayax — dhagax xiddig — guri — gabar — faras — xarig — bohol — ayax xurbin — jilib — tuke — kubbad — markab — mundul — olol lacag — nacnac — qalin — maro — orgi — ido — dibi shimbir.

2) Erayo laba cod oo mid shaqal dheer leeyahay leh:

qaanso — shaati — sariir — ashuun — saacad — shabeel sabuul — dhurwaa — yaxaas — caleen — muufo — khoori libaax — kalluun — kitaab — geeso — fallaar — feynuus dameer — canbuur — huuri — deero — mooye — haruur.

Layli:

1) Qor toban eray laba cod leh oo shaqal gaaban.

2) Qor toban eray laba cod leh oo mid shaqal dheer leeyahay.

Higgaadda far Soomaaliga

1) Waa erayo labo cod oo shaqal dheer leh:

Doofaar — baabuur — daayeer — doolaal — duufaan

dhaandhaan — laayaan — naakhuude.

2) Erayo labo cod ka kooban akhri:

Harimacad — mafafaay — goroyo — jelmed — firimbi

moqorof — dhilmaanyo — dawaco — dayuurad — maroodi

silsilad — fatuurad — feynuus — magaalo.

Layli:

1) Qor lix eray laba cod oo shaqal dheer leh.

2) Qor lix eray laba cod ka kooban.

WEEDHAHAN AKHRI

1) Lo'da' ceelka gee.

2) Meeqa sano baad jirtaa?

3) Mafafaay macaan keen.

4) Cali waa nin weyn.

5) Seefta galka ka saar.

6) Muusku iib mahaa.

7) Kanu waa go' xun.

8) Shaati wanaagsan u gad.

9) Eebow timir macaanat

10) Teneggan subag baa ku jira.

11) Geed laamo badan.

12) Daalo khal ah ii soo iibi.

Layli:

Qor shan weedhood adigoo iska ilaalinaya kuwa kor ku qoran.

Erayada lab iyo kuwa dhiddig u fiirso:

Lab	Dhiddig
We'yl	Weyl
Be'er	Beer
I'nan	Inan
Dame'er	Dameer

1) I'nan iyo inan is guursaday.
2) Sac we'yl leh.
3) Be'er wanaagsan u gad.
4) Dame'er ci badan.
5) Dame'er gado dameerse ha gadan.

Layli:

Qor lix weedhood, shan lab tahay, shana dhiddig.

Baro weero dhaadheer sida loo abuuro.

1) Hadal yar iyo hawl badan.
2) Nin xun oo go' xun huwan.
3) Jid mala martay, jidiinse mala cuntay?
4) Tuug baa xaday lacagtii khasnadda ku jirtey.
5) Aan hirgelino Afkenna hooyo.
6) Waa guri jabad ah.
7) Xaawo waa gabar qurux badan.
8) Higgaadda far Soomaaliga si aad ah u baro.
9) Cumar waa nin da' weyn.
10) Surad waa buur dheer.

Layli:

Qor toban weedhood oo kuwaa ka duwan.

«DOOD DHEX MARTAY SADDEX QOF»

1) Bare: — Faaduma iyo Xaliima, tiineebaa dugsiga dhigata
   — Xaliima: — anigaa dugsiga dhigta, Faadumase ma dhigato.
   — Faaduma: — Waa run oo anigu dugsiga ma aado, maxaa yeelay faa'iidoyinka laga helo ayaan garan.

2) Bare: — Xaliimo, aan ku dhegeeystee u sheeg oo ka dhaadhici Faaduma waxyaabaha faraha badan oo dugsiga laga barto.
   — Xaliima: — Dugsiga waxa laga bartaa sida wax loo qoro, waxna loo akhriyo, xannaanada carruurta, nadafadda guriga, dhaqanka, bulshada iyo dhaqaalaha iyo waxyaala kale oo soo raaca kuwaas oo wax tarmo u leh dalkeena iyo dadkeenaba.

Layli:

Ka warceli weydiimahan:

1) Dugsiga ma dhigataa?
2) Maxaad u dhigata?
3) Aikenna hooyo ma hirgalisaa?
4) Qalabka dugsiga wax ma iiga sheegi kartaa?
5) Baraha dugsiga aad dhigato magacii?
6) Sheeg faa'iidoyinka laga helo?

WAA YAAB!

Diqsi ayaa daalay. Markaas ayuu wuxuu ku fariistay dibi geeskii. Markuu nastay, ayuu wuxuu ku yiri dibigii:
'Iga raalli ahow, haddaan ku culeysiyay. Waxaana igu habboon in aan geeskaaga ka duulo; waxaan ka baqayaa in geesku ila ciiro. Intii aan ku joogayn mahadsanid».

Dibigii wuxuu yiri: «Waa yaab!» Diqsigii baa yiri: «Maxaa kaa yaabshay?» Dibigii wuxuu yiri: «Waxaa iga yaabshay culeeska aanan ogaan markaad i saarayd iyo markaad iga degtay midna».


CASHARKA LABA IYO LABAATANAAD

1) Dumarku sida ragga uma caqli badna. Sidaa awgeed waa inay ragga adeecaan, waxna ka bartaan.

Dumarku ragga kama caqli yara, waana la karti. Sidaa awgeed waa in iyaguna wax laga bartaa, sida iyaguba ragga wax uga bartaan.

2) Waa inaynu ubadka dilnaa, cabsiinaana, haddii kale wax baran maayaan, horukacna samayn maayaan.

Maya, ubadka iyo waayeelkuba diliinka iyo caga juglayska wax kuma laha oo way ka gilgishaan. Sidaa awgeed waa inaynu si naxariis iyo gacaltooyo leh ula dhaqanaa oo wax u baraa.



DIIQ IYO DAWACO

Waxa la yiri berri baa dawaco maqashay diiq geed dul saaran qayladii. Markaas bay u timid oo ku tiri diiqii:

«War cod fiicnidaa! Geedka ka soo deg si wacan iigu celi».

Diiqi, isagoo gartay ulajeedada ka dambeysa erayada macaan ee dawacada, ayuu wuxuu ku yiri:


«Waxad igu sugtaa godka geedka hoostiisa ku yaal, waa soo degi doonaa». Diiqu eey buu godka ku ogaa.

Dawacadii, iyadoo aad u faraxsan oo isle maanta waad dhargi oo diiqa baad cuni, ayay godka xaggiisa aaday. Markaay u dhowaatay godkii ayay waxay aragtay eeygii diiqu meesha ku ogaa. Markaas bay (illeen dawaco eey lama tusee) cagaha wax ka dayday oo carartay.

Dawacdii islahayd diiq cun, iyadii baa sigatay.

(God walaal ha qodin, haddaad qodidna ha dherayn, ku dhici doontidna lama ogee).

GAADIIDKA DHULKA



GEELA

Geelu wuxuu ka mid yahay xoolaha lagu dhaqmo, waana la rartaa. Aad iyo aad buu dadka wax u taraa. Reer miyigu waa ku guuraan, waa ku dhaansadaan, waana ku socdaalaan.

Isaga oonka, kuleelka iyo gaajada xoolaha kale waa uga adkaysi badan yahay.

Waxtar fara badan ayuu geelu leeyahay xagga nolosha dadka: Caanaihiisa oo la dhamo, hilbahiisa oo la cuno. Waxa maqaarkiisa laga sameeyaa: Suunan, kabo, boorsooyin iwm.

Gaadiidka cusub intaan la baran horteed, geela waa la raran jiray. Dad badan oo ku nool dhulka carabta, siiba meelaha lama

dagaanka ah, oo aanay baabuurtu mari karin, waxa weli la rartaa geela.

Sidaas daraadeed wuxuu ku magac baxay: «(Markabka lama dagaanka)».

(U Naxariista xoolaha: Sidiinoo kale ayay naf leeyihiin).


KALA GARO QODOBYADA

Ka — Ga — Sha

	Gaashaan	—ka	—	gaashaanka
Ka	Fandhaal	—ka	—	fandhaalka
	Miis	—ka	—	miiska
	Jid	—ka	—	jidka
	Kursi	—ga	—	kursiga
Ga	Eey	—ga	—	eeyga
	Xarig	—ga	—	xarigga
	Dugsi	—ga	—	dugsiga
	Bil	—Sha	—	bisha
	Il	sha	—	isha
Sha	Ul	— sha	—	usha
	Hal	sha	—	hasha

Aan wada hadalno, waa aan heshiinno.

WAXBARASHADA IYO AQOONTA



Dadka wuxuu ku kala hormaraa oo ku kala nolol fiicnaadaa siday u kala aqoon roon yihiin.

Aqoonta si fudud oo cayaar ah laguma helo; dhib iyo soojeed ayay u baahan tahay. Qofka doonahaya inuu aqoon yeesho waa inuu dadaal badan iyo karti la yimaado. Waa inuusan marnaba ka daalin wax barashada si uu u korodhsado aqoontiisa.

Qofkasto oo Soomaali ah, yar iyo weynba, maanta awood wuxuu u leeyahay inuu si sahlan wax u barto oo uu aqoon u yeesho, maxaa yeelay afkii hooyo baa la qoray oo hirgalay. Haddaad dadaashaan oo aad wax barataan, waxa hubaal ah in ay Soomaaliya gaarayso oo helayso waxay rabto xagga dhaqaalaha iyo dhaqanka oo ay dhisi doonto bulsha cusub oo caafimaad qabta.

«Nim*aan* dhididin ma dhergo».

HEES

«Dugsiyada ogaada»

1) Aqoon la'aani waa iftiin la'aane —

Waa aqal iyo ilees la'aane.
Ogaada — ogaada — dugsiyada ogaada —
Oo aada — oo aada, walaalayaalo aada.

2) Waa oomanaan iyo abaare —
Omos iyo biyo la'aane
Ogaada — ogaada — dugsiyada ogaada
Oo aada, oo aada, walaalayaalo aada.

3) Indhaha aan ku kala qaadnee —
ifka ugu ilbax sanaane
Ogaada — ogaada — dugsiyada ogaada
Oo aada — oo aada walaalayaalo aada.

(Cabdillaahi Qarshe)

GO'AAN JIIR

Jiir baa meel degganaa. Hog ayay ka dhisteen meeshaas. Bisad baa godkii ku ogaatay. Dabadeed waxay ku sugtey godka afkiisa, midkii soo baxaba way cuntay. Markay bisadii cuntay dhowr jiir, ayay talo ku cadaatay jiirkii. Maalintii dambe ayay shir qabteen. Jiir oo dhammi shirkaa wuu ka soo qayb galay — mid yar, mid weyn, iyo mid caaqil ahba. Talo waxay ku dhammatay in bisadda layska qabto. Waxase la is weydiiyey sida laysaga qaban lahaa bisadda.

Madaxdoodii waxay ku talisay in bisadda koor qoorta loo geliyo. Jiir waaya-arag ah baa kacay oo yiri: «In koor qoorta loo sura way fiican tahay, waxase la rabaa ninkii u suri lahaa».

Talo iyo shir jiir halkaas ayaa u dambeeysey.

YEERIS

Barihi baa yiri:

Waxan aqaan nin xeerka nabadgalyada waddooyinka aqoon dheer u leh.

Ninkaasu wuxuu ku dadaala inuu aqoontiisa ka faa'iidaysto. Waa nin xilkas ah, had iyo goorna wuxuu ku dadaalaa inuu baabuurkiisa si deganaasho ah u wato.

«Waxaa kaloon aqaan nin isna wade ah oo aqoon iyo niyad wanaagsan nabadgalayada u leh. Wuxuu ka fikiraa wanaaga iyo nabadgalyada jaallayaashiisa kale, labadaraadle, wuxuu ka digtoonaadaa baabuurta ka horreysa iyo kuwa ka dambeeya.

Waxa nalaga doonayaa inaan baranaa asluubta jidka loo maro iyo sidii aan u ilaalin lahayn xeerka nabadgalyada waddooyinka.

KALA GARO QODOBYADAN

— Ta — Da — Ha

	Xiddig	—ta	—	xiddigta
ta	Kab	—ta	—	kabta
	Laan	—ta	—	laanta
	Far	—ta	—	farta
	Mindi	—da	—	Mindida
da	Qaanso	—da	—	qaansada
	Xeero	—da	—	xeerada
	Qorrax	—da	—	qorraxda
	Waraabe	—ha	—	Waraabaha
ha	Caano	—ha	—	caanaha
	Biyo	—ha	—	biyaha

WAX BADSO WAX BEEL BAY LEEDAHAY



Waa baa waxaa jirtay habar duunyo oo dhan ka lahayd diggaagad qur ah. Maalin walba diggaagadaasi waxay dhali jirtay hal ukun ah.

Waxay sidaas ahaataba, maalin maalmaha ka mid ah ayay habartii is tiri: «Haddii diggaagadan maalin walba hal ukun ah ii dhasha aan u badsho cunto iyo biyaba, waxay ii dhali lahayd ukun tiro badan markiiba».

Habartii sidaas ayay talo ku gaartay oo ku goosatay. Diggaagadii ayay cunto iyo biyo badan siisay.

Nasiib darrase, waxa dhacday, markay diggaagadii cunto iyo biyaba ka dharagtay, in ay cayisho oo ay xayr is dhaqaajin kari wayday. Iskaba daayee ukun fara badan oo ay dhashee, middii quraheed baa laga waayay.

Habartii, wax badso islaheed ,waxa halkaa ka raacay wax beel.

XALIIMO IYO SACDIYO

Xaliima waa ardayad fariid ah. Weligeed waxay dugsiga timaada goor fiican, ayada oo diyaar ah oo sidata buugaggeedii iyo qalinkeedii.

Shalay, dugsiga agtiisa, waxay kula kulantay jaalkeed Sacdiyo. Waa is nabadaadiyeen:

«Subax wanaagsan Sacdiyo. Maanta canbuur cusub baad sidataa, kayguse waa yare duug; waxanse qabaa garbasaar taada ka fiican. Kabahayguna kuwaaga ayay u eg yihiin».


Xaliima waa gabar wax garad ah oo u fiirsata wax walba, waliba goortay dugsiga joogto.

Intaa waxa u dheer oo ay Xaliima taqaan, asluubta dadka lagula dhaqmo iyo tan saxiibtinimada.


Layli:

1) Yey Xaliimo shalay kulmeen?
2) Xaggee bay Xaliimo joogtay?
3) Maxay Xaliima iyo Sacdiya is yirahdeen?


Digniin Bare: Arday waliba waa inuu dhigaa sheeko gaaban oo ku saabsan dugsiga uu dhigto iyo saaxibkii ama saaxiibadeed.




Goroyadu waa dheerayn badan tahay.



Diinkuna aad buu u gaabiyaa.



Dabku waa kuleel badan yahay.



Barafkuna waa qabow yahay.

Dambiga afar ayaa ugu waaweyn:

(1) Eebbe la inkiro; (2) Waalidka lagu caasiyo;

(3) Qof la dilo; (4) Marag been ah la furo.

1) Haddii aan arrin go'aan haboon laga gaarin, dhibaato ayaa ka askunta.

Aan dubanno iyo *aan* karsanno fuudk*aa* ku luma.

2) Qof waliba waa inu dantа bulshada, dantiisa gaar ahaanayd ka daryeelaa.

Qof walba oo bulshada ka mid ah xil baa jaallayaashiisa kale ka saaran. Sidaas awgeed waa inuu dantiisa gaar ahaanayd midda bulshada ee caanka ah ka daryeelaa.

3) Waa inaynu wax walba sida uu Eebbe u abuuray u dhaafnaa oo aynaan waxba bedalin.

Cawli ban bay u baratay buuri u dhaantaase mooyi.

Horumarkeennu gacmaheenna ayuu ku jiraa. Marka aynu isu tagno ee aynu wadajir wax u qabsanno ayaynu wax walba bedali karnaa oo aynu guul gaari karnaa.

Kala garo tilm*aa*maha:

Keli lab	Keli dheddig
Kan	tan
kaas	taas


1) kan iyo tan: waxay tilmaamayaan waxa laga hadlayo oo kuu dhow;

2) kaas iyo taas: waxa laga hadlayo oo kaa fog.


Tusaale: Waxa kuu dhow:



Tan waa naag qurux badan




Kan waa wiil timo madow




Tan waa sariir joodari cusub

Tusaale: Waxa kaa fog:



Taasi waa sariir firaash wacan leh



Kaas waa will shaati duug ah qaba



Taas waa naag canbuur midabo fiican gashan.

U fiirso tilmaamaha aad soo baratay magaca gadaal bay ka raaci karaane:

1) Ninkan waa buuran yahay;

2) Wiilkaas waa aqli badan yahay;

3) Sariirtan waa firaashan tahay;

4) Sariirtaas joodari ma laha.

U fiirso keli iyo koox

Keli	**Koox**
Kan, tan	Kuwan
Kaas, taas	Kuwaas

SOO NOQ — NOQASHADA XISAABTA

Nin shan dameer lahaa ayaa socdaalay. Markuu cabbaar socday ayuu is yiri: «Bal aan eego oo xisaabo in ay dameeruhu dhan yihiin: kow, labo, saddex, afar».

Wuxuu, ninkii socdaalayay, ka tagay uusan xisaabta ku tirin oo uu halmaamay, dameerkii uu saaraa ee gaadiidka u ahaa. Talo ayaa ninkii ku xumaatay. Yaab iyo argagax buu la dhacayl Sidee wax u dhaceen buu is weydiiyey.

Markay arimi halkaa marayso, ayuu, dameerkii uu saaraa ka degay. Xisaab ayuu dib dameeradii ugu laabtay: kow, labo, saddex, afar, shan. Waxba kama maqna oo dameeradii waa dhan yihiin.

Markaasuu, ninkii, farax dartii qosol ku dhuftay. Wuxuuna yiri: «Markaan dameerka saarnaa afar ayay dameeradii ahaayeen. Kolkiise aan ka degay way idlaayeen oo shan ayay noqdeen».

Ninkii wuxuu talo ku goostay oo uu yiri: «Waxa aniga ii dan ah oo ii roon inaan lugahayga gaadiid ka dhigto oo aan ku socdo intii aan dameer iska lumin lahaa».

Sidaas ayuu socdaalkii u dhammaystay.

XAAWA IYO NADAAFADDA GURIGA



Dadku guryaha wuxuu u dhistaa inuu ku nasto, seexdana. Waxa kale oo dadku guryaha u dhistaa inuu kaga badbaato oo uu kaga magan galo waxyaabaha nolosha dhibaato u keeni karo. Kuwaas oo ay ka mid yihiin: dabaysha, kulka, qabowga, bahalada iyo waxyaaba kale oo khatar galin kara nolosha dadka.

Miyi iyo magaalaba waxa dadku leeyahay guryo ay u hoydaan, dhigtaana alaabo tira badan oo ay wax ku qabsadaan. Alaabta guryaha magaalada la dhigto waxa ka mid ah: sariiro, joodariyaal; kuraas, miisas, darmooyin, gambaro, iwm.

Dhismaha guryaha waay kala duwan yihiin. Qaarkood waxa laga sameeya dhoobo sida: mundulka, cariishka, kuwa kalana waxa laga sameeya loox, sida: baraakada; qaar kalana waxa laga sameeya dhagax sida: sarta ama daarta. Kuwa ugu dambeeya waa dhismaha ugu fiican uguna qurux badan.

Xaawo waa haweenay da'yar. Waxay leedahay guri baraaka ah, kuna yaal xaafadda Kaaraan ee magaalada Xamar. Xaawo gurigeeda waxa uu ka kooban yahay shan qol: qol la seexdo, qol-ka cunada, qol wax lagu akhristo, qol lagu nasto oo lagu shee-kaysto iyo jiko. Waxa kale oo guriga ku yaal musqul.

Qol kastaa wuxuu leeyahay dariishado waaweyn oo gees wal-ba kaga yaal ooy neecwada ka soo gasho.

Xaawi waa haweenay gaari ah oo ku dadaasha nadaafadda gurigeeda. Goor walba gurigeedu waa nadiif oo qashin ku arki maysid.

Xaawi, agagaarka gurigeed, waxay ku sameeysay beero yar-yar oo ay ubax midab qurux badan leh ku tallashay.

Haweenka Soomaaliyeed, inta badan, waa gaariyaal sida Xaa-wo oo kale. Waxay jecel yihiin inay ku dadaalaan, had iyo goor, meesha ay carruurtooda, nimankooda iyo ayaguba ku hoydaan inaan lagu arag qashin. Weliba waxay ku dadaalaan inay ka ilaa-liyaan waxyaabaha cudurada keena.

Waxa haboon hooyooyinku inay fiira dheer yeeshan. Gur-yaha la nadiifiyo, daaqadahana loo furaa si ay qorraxda iyo nee-cawduba u soo galaan.

Layli:

Ka warceli weydiimahan:

1) Guryaha maxaa loo dhistaa?
2) Dhismaha guryaha meeqay u kala baxaan?
3) Xaawo gurigeeda xaafaddee buu ku yaal?
4) Nadaafada guriga Xaawa ka waran?
5) Imisa qol ayuu ka kooban yahay Xaawa gurigeedu.
6) Maxaa guryaha daaqadaha loogu yeelaa?

Naag walba rugteedaa lagu gartaa

KALA GARO MAGACYADA: KALI IYO KOOX

Kali			Koox		
Laan	—	laanta	Laamo	—	laamaha
Ul	—	usha	Ulo	—	ulaha
Waraabe	—	waraabaha	Waraabayaal	—	waraabayaasha
Aqal	—	aqalka	Aqallo	—	aqallada
Fure	—	furaha	Furayaal	—	furayaasha
Firimbi	—	firimbiga	Firimbiyaal	—	firimbiyaasha
Dhagax	—	dhagaxa	Dhagaxyo	—	dhagaxyada
Shabeel	—	shabeelka	Shabeello	—	shabeellada

Layli:

Ka samee koox magacyadan:

(1) Buug — buugga; (2) Jid — jidka;

(3) Wan — wanka; (4) Jiir — jiirka

(5) Miis — miiska (6) Nal — nalka



LABA NIN OO BEERALEY AH

Waxa jira laba nin oo beeraha aad u jecel oo tacbada. Labada nin mid waxa la yiraa Cabdi, kan kalena Guuleed.

In kastoo Cabdi waligiiba jeclaa shaqada beeraha, haddana maran sidaa u fogeeyn ayuu beerta tacbashadeeda bilaabay. Aabihii oo dhowaan geeriyooday baa wuxuu uga tagay dhul aad u ballaaran oo lahaa caws, dhir yar-yar iyo geedo sare. Isagoo ogsoonaa dhibaatooyinka la xiriira tacbashada beerta, ayuu Cabdi si xilkasnima ah ,cawskii iyo dhirtiiba gubay. Geedihii sarana jarjaray. Kaddibna wuu carro geddiyey. Halkaa waxa ka soo baxay dhul ballaaran oo waxa curatay beertii ugu horeysay ee uu Cabdi leeyahay.

Waqtiga aynu joogno beerta Cabdi waxa ka baxa: galley, haruur, sisin, digir iyo qare. Wuxuu ka ilaaliyaa wax kasta ee dhibaato u keeni kara dad iyo duunyaba.

Markay miro bixisana, wuxuu ka dhiciyaa ayaxa iyo shimbiraha faraha badan oo miraha cuna.

Cabdi waxa deris la ah Guuleed oo ah nin da' weyn beereyna weligii ahaa. Beerta Guuled aad bay uga duwan tahay tan Cabdi oo waxa ka baxa, cambe, mafafaay, qumbe, muus, basal iyo yaanyo. Wuxuu Guuleed ka mid yahay nimanka beeraha waaweyn leh ee muuska dibadda u dhoofsha.

Haddii la eego xagga qalabka, beerta Guuleed waxa lagu falaa cagaf-cagafyo cusub, waxana lagu waraabiyaa biyaha webi oo matoor soo saaro ama roob. Hase yeeshe tan Cabdi waxa lagu falaa yaambooyin marna dibi. Waxana waraabiya oo ay ku baxdaa roobka oo qur ah.

Cabdi waa ma daale oo hawsha beerta kama nasato. Gu' iyo xagaaba beerta ayuu tacbaa oo beeraa.

Wuxuu weligiiba jeclaa inuu iskaashato la sameeysto niman deris la ah oo beero tiisoo kale leh, isagoo tixraacaya maahmaahdii ahayd: «Ilko wada jir bay wax ku gooyaan». Sidii uu jeclaa ayuu ku dhaqaaqayo oo sameeyay. Beerta Cabdi maanta waxay ka mid tahay iskaashatooyinka kuwa ugu waaweyn ee Soomaaliya laga helo.

Layli:

Ka warceli weydiimahan:

1) Beer ma leedahay?
2) Beertu biyo la'aan ma baxdaa?
3) Beerta Cabdi maxaa ka baxa?
4) Wax ma iiga sheegi kartaa qalabka beerta lagu fasho?

«TALO LIBAAX»

Maalin baa dawaco dhurwaa ri' ka xadday oo ka cuntay. Si aan loo ogaan, loona garan ayay sameysay. Waxay u tagtay goroyo geed harkii huruda. Si tartiiba bay ugu dhowaatay oo subagii iyo xayrtii ri'dii ay cuntay afka ka marisay.

Dhurwaagii ri'da lahaa dawacadii ayuu tuhmay, wuxuuna ku yiri: «Dayooy, ma adigaa ri'dii iga cunay». Dawacadii baa tiri: «Maya! Allahay waa alla! anigu ri' kaama cuninn! Waxanse u malaynayaa in ay goroyadu cuntay, maxaa yeelay, afkay subag ku leedahay». Markay gorayadiina dambigii qiran weyday, ayay saddexdoodii is raaceen. Waxay u tageen libaax inuu u gar naqo. Libaaxii wuxuu yiri: «Waa in god dheer oo ballaaran la qodaa, dab lagu shidaa, dabadeedna laga boodaa. Qofkii dambiga galay isagaa ku dhici oo halkaas ku qur waayi».

Libaaxii baa ugu hor booday, isagoo oranaaya:

«Anigu waxan awoodaa inaan jabsho rati lix jir ah qoortiisa».

Dhurwaagii baa isna booday, isagoo aranaya: «Anigu dadka ayaan dhibaa».

Goroyadii baa booday, iyadoo oranaysa: «Anigu waxan ahay midda habar dugaag oo idil ugu dheeraysa».

Dawacadii markii la gaaray ayay waxay tiri «Saaxiibayaalow: ha i eegina markaan boodaayo anigu waan xishoonayaaye».

Markay giddigood sii jeesteen, ayay, godkii hareer martay oo tagtay dhinacii kale. Ayadoo iska dhigaysa qof soo booday

ayay tiri: «Anigu godaadka dhexdooda ayaan naylaha ku cunaa»

Libaaxii sirtii dawacada wuu gartay, wuuse u dambi dhaafay. Hase yeeshee dhurwaagii ayuu talo siiyey oo ku yiri:

«Waa inaad barataa sidaad u daryeeli lahayd xoolahaaga».

Talo la diidaa tagooga jab bay leedahay

«FURIIN LALA WADA YAABAY

Waxa la yidhi nin baa naag guursaday. Kolkuu habeenkii la aqal galay, ayuu subaxdii ba furay. Markii la weyddiiyey ee la yidhi, 'Waar maxaa ilaahay sidaas kuugu galay ee aad naagta u furtay?» Wuxuu yidhi, «Waar naagtu waa xoolo hunno oo way ayaan daran tahay oo way camal xun tahay oo waa qumanyo».

Waxa la yidhi, «Oo habeen keliya baad guri ula hoyataye, sidee baad u garatay inay tilmaamahaas oo dhan leedahay?» Wuxuu yidhi, «Horta waa xoolo hunno oo kabihii aan bannaanka kaga tegey bay soo xerayn weydey. Wayna ayaan daran tahay oo kabihii ma badbaadine, habeenkii baa dacawo cuntay. Way camal xun tahay oo dabkii baa hore ugu bixi waayey, kolkaasay habaartay oo tidhi, «daad ku qaad». Waana qumanyo oo habaarkii bay dabkii la heshay. Habeenkii baa roob weyni da'ay oo daad na qaaday».

Kolkaas ninkaasi habeenkii oo dhan buu naagtaasi tallaabadii ay qaadaba u fiirsanaayey. Waxaanu goostey inanay sina u wada dhaqmi karayn.

Naago ama u samir ama ka samir.

LABA NACAS

Waxa la yiri, berri baa laba nacas wada socdaaleen. Waxay socdaanba, goortay meel ilaahay og yahay marayaan, ayey harrad iyo surmi lug riixi waayeen. Cid ay ku eertaan oo meelahaas ka dhowina ma jirto. Kolkaasay geed hoos fadhiisteen oo cabbaar hadhkii ku nasteen.

Labada nacas kii weynaa, ayaa saaxiibkiis ku yiri, «Waar hebel, waar waa tan oo harraad baynnu u baqtiyeynaaye, maxaynnu yeelnaa?» Kii yaraa baa yiri, «Wallaahi hebel, wax aynnu samaynno garan maayo». Kii weynaa baa yiri, «Waar heedhe, waar balligii meel hebla ku yiil ee aynnu shalay soo ag marnay, ayaa meel biyo ceshata inoogu dhowe, orod biyo inooga doon, anigu kici kari maayo e».

Kii yaraana hadal kuma soo celinne, halkii buu orod isa sii daayey. Wuxuu sii hashleeyaba, goortuu balligii gaadhay, ayuu ciil dibinta qaniinay. Wuxuu u tegey balligii oo goof ah oo aan bar biyo ah lagu ogeyn. Halkii buu isaga oo gorodda laalaadinaya soo hungo lugeeyey.

Wuxuu soo jiitamaba, saaxiibkiis buu u yimid naceen badhkii dambe. Kolkaasuu meel agtiisa ah ku gataati dhacay, Gabi Kii baa madaxa kor u qaaday oo xaggan u baallo daymooday. Kolkuu arkay ninkii yaraa oo neeftii ku ceshoontey, ayuu naf iyo nololba ka quustay. Ku ye, «Waar hebel, waar balligii ma tagtay? Wax biyo ahse ma ka heshav?».

Kii yaraa oo hadalku dirqi kaga soo baxayo baa yiri, «Tegey, waxna kama helin».

Waar ma Ilaah baa kugu og?

Wallaahay waa engegnaaba!

Waar hebel, waar ma hubtaa?

Waa hubaa.

Intaas markii lays weydaarsaday, ayaa kii weynaa iska kacay oo xaggii balliga dib ugu laabtay. Kii yaraa baa yiri, «Waar xaggaad hadda u noqotay?». Ku ye, «Balligii baan ku soo quusanayaa». Kii yaraa baa isna ka daba kacay. Kolkaasaa kii weynaa weydiiyey, «Oo adna xaggeed ku socotaa? «Markaasaa kii yaraa yiri, «Dee anna balligii baan kugula soo quusanayaa».

BARASHADA FAR SOOMAALIDA

(Gabay)

Gabygani wuxuu ka mid yahay kuwii u dambeeyey ee uu tiriyo Xaaji Aadan Afqallooc. Wuxuuna tiriyey Oktobar 29, 1972, waxa uu tilmaamayaa sida barashada fartaadu ay uga hawl yar tahay tan qalaad, waxbarashada qofkana ay kaalmo weyn uga tarayso. Wuxuu yiri:

Ninna kuma aflaxi hadal dad kale u akhriyaayaane
Afhayeenka kuu sheegayaa waa adoo kale e
In yar buu fahmaye maahan kii aabbihiis yidhiye
Aayaha dhulkaaga iyo dantaa lagu allaawaye
Kuwii uurka kula jiifsadaad arag collowdaane
Haddaan dhaqanka laysaga ekaan laysma aamino e
Waa kala ajnabi laba kastoo ehel wadaagaaye
Mid waliba afkaar gooniyuu ku isticmaalaaye
Afar qofoo wallaalo ah haddii ruuxba beled aado
Mid waliba akhlaaq gooniyuu kala imaadaaye
Arrinna kuma heshiiyaane way kala irdhoobaane
Mid waliba adaa toosan bay ula ekaataaye
Sidaasay barkood u eg yihiin inamadeenniiye
Waa waxay isu afdhaafayaan odayadoodiiye
Qaarbaa ankiray qoysaskay ka isirraayeene
Barashada hidduhu ku ambada waa idho la'aane
Asalka iyo caadooyinka idinka oo haysta
Aqoontana badsada waa tacliin waxaad u aydaane
Labadaba afkii hooyadaad aad u garanayso
Oo aan ku anbinayn baa iskuul eegga la furaye
Edebta iyo dhaqankii lumay baad ururinaysaane
Ishtihaada taariikh horlaad u ambaqaaddeene.

TUUG TUUG MA XADO

Waxa la yiri nin baa wan buuran oo shilisi adhiga ugu jirey. Laba tuug baa wankii iska ilaalaystay ,ninkii lahaana meel ay ka maraan iyo si ay wankii uga xadaan bay garan waawyeen. Ninkiina wuu ogaaday danta tuugtani leedahy.

Maalintii dambe, ayaa ninkii fakaray. Wuxuu isyiri, «Wallaahi wankaas inaad qasho wuxuu ku dhaamaa inaanay jirin! Maxaa yeelay, nimankaasi ama way kaa xirrib badin oo wankay xadi, kolkaasna waad ku cood iyo cadba beeli; ama iyagoo xadaya baad ku qaban oo waad ku dhagaroobi». Wuxuu goostay inuu habeenkaas qalo oo iska shidaysto.

Labadii nin ayaa iyaguna habeenkaas naftiisa ku tashaday inay wanka xadaan. Reerkii bay u soo duddo galeen. Waxay arkeen naagtii oo wankii haragga ka bixinaysa. Kolkaasay ciil iyo murugo daraadeed farta dhexda ka qaniineen. Mid baa yiri, Waar nacasyohow, reerka sidaas kaga tegimeyno e, aynu haatan hilbaha qaadanno. Khiyaamadii aynu ku qaadi lahaynna, anigaa inoo aqaan».

Kii kala baa yiri, 'Oo sidee baynnu wanka halkaas ka dejelan ee naagtu mindida ku hayso u xadi karnaa?» Wuxuu yiri, «Dhegeyso, adigu orodoo ilmaha yar ee halkaas ardaaga jiifa, intaad kaga oohiso la baxso. Kolka lagaa soo daba yaaco, ayaan aniguna wanka u weydaaran doonaa. Dabadeedna wavaynu isugu iman doonaa meel heblaayo».

Sidii baa arrinkii lagu gorfeeyey. Kolkii uu wiilkii dhufsaday, ayaa naagtii qaylo ka kacday, «Waar wiilka bahalka ka rid! Waar wiilka bahalka ka rid! Waar wiilka bahalka ka rid. Alla jabay! La tegl. Ninkii baa soo baxay oo tuuggii cagta cagta u saaray. Kii kalena intii xaggan lagu sii jeeday buu wanka hilibkiisii la baxsaday. Wax lays eryadaba ahadhow baa tuuggii intuu wiilkii iska dhigay, cagaha wax ka deyey oo dhuuntay. Kolkii ninkii wiilkii isa soo dul taagay, ee uu arkay inaan wiilku waxba qabin, ayuu ogaaday inaan wiilka bahal sidanine, labadii tuug xirribtan sameeyeen.

Halkii buu orod dib isu sii daayey. Qori dab leh buu la rooray. Markuu joogo meeshii uu ku maleynayey in tuugtu isugu iman doonto, ayuu qunyar tallaabsaday. Qorigii dabaka ahaa buu iska lalmistay oo foori ku dhuftay.

Tuuggii wanka sidey, ayaa moodey saaxiibkiis oo ka soo hor maray. Wankii oo uu ku raran yahay buu la soo aaday ninkii lahaa. Kolkuu u yimid buu wankii oo uu ku daalay degta ka soo regey oo ninka agtiisii baldhaq kaga siiyey. Ku ye, «Ma soo dhigay dhehl» Ninkii wanka lahaana, intuu budh isla kala jiiday buu tuuggi labada mergi gooyey, kafl Kolkaasu ciidda cunsiiyey. Ku ye, «Ma ka dhigay dhehl»

Halkii buu wankiisii iska xamaashay oo gurigtisii ku cunay.

TIXO MURTI AH

1) Sebben tegey mid weli soo socdiyo saaka waxa jooga,
Saddexdaa waqti baa xaal addun lagu sifeeyaaye,
Soo noqod ma jiro shalay wixii saadufoo tegaye,
Waxa saaddambeetiyo berrina waa su'aal maqane,
Waxay taladu kuu suubban tahay subaxaad joogtaaye.

— Xaaji Aadan Afqallooc

2) Inaad luqunta hogaamisiyo hogasho ciil baa leh
Meeshiyo habeen aakhirana hibasho maag baa leh.

— Nuur Xiddig

3) Aboorkuba alleylkuu dhisaa aqallo waaweyne,
Markuu ururay daartuu ebyaa la ashqaraaraaye,
Ilkuhu wada jirkoodey hilbaha adag ku goostaane,
Hadday iniba meel taagan tahay adhax ma feenteene.

— Xaaji Aadan Afqallooc

4) Rag kaa faqay rafiiq nimad tihiin talo lagaa reebay,
Halkii aan lagaa rabin indhaha lalama sii raaco.

Lamayaqaan

5) Afka malab nin ii marinayo mid uga hooseeyo
Oon doonihayn inaad heshana daayin abidkaaye

Lamayaqaan

6) Baadida nin baa kula deydaye daalna kaa badane
Oon doonihayn inaad heshana daayin abidkaale
Dadkuna moodi duul wada socdaan wax u dahsoonayne
Delloo ma laha aakhiro haddii loo kitaab dayo e.

Qamaan Bulxan

CASHARKA LIX IYO AFARTANAAD

URUR IYO ISKAASHAD

Waxa hubaal ah inaan marna ifka lagaga maarmi karin urur, wadajir iyo iskaashi garabka lays qabsado. Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa, «Ilko wada jir bay wax ku gooyaan». Maxaa yeelay, haddii iligba meel taagan yahay adaax ma feenteen.

Murti kalena waxay tidhaahdaa: Shan nin oo wax wada qaybsi leh, shanshaa ka baxda, shan nin oon waxa wada qabsi lahaynna shan shansho. Cabdillahi Muuse oo ragga Soomaalida ee gabya ka mid ahaana wuxuu yiri:

> Tabantaabaday laba gacmood tamar ku yeeshaane,
> Tiska waxa la qaadaa markay tiirisaa bidixe,
> Hadday midigtu keli taagan tahay ma goyseene.

Kolkii dhab loogu fiirsaday addunyada waxa ku nool, waxa la ogaaday in abborka iyo qudhaanyadu ugu horreeyaan xagga ururka iyo wax wada qabsiga. Labadaas cayayaan, waxa ay caan ku noqdeen wax adduunka oo idil looga baahan yahay iana samayn kari waayey iyadoo aan wax dhibaato ah oo ku gedfani aanay jirin. Taas oo ah urur, iskaashad iyo wadajir.

Sankuneefle intii isku jaad ahba, waxa ka dhexayn kara isu tegid ay lib iyo guul ku gaadhi karaan. Ilaahayna wuxuu quraankiisa ku yiri, «Wactasimuu bixablillaahi jamiican walaa tafarraquu» (Xadhigga Ilaahay isugu taga oo wado qabsada, hana iskhilaafina oo ha kala biiqina).

Haddii aynnu aboorka u fiirsanno, waxaynu arkaynaa inta itaalkiisu le'eg yahay iyo guryaha uu galo ee ciidda ka sameeyaa

inta ay dherer iyo laxaad le'eg yihiin. Dalkeenna wuxuu u baahan yahay dhismc, sida kcliya ee hawlahaas lagu fulin karana waa wax wada qabsi iyo wadajir loo dhan yahay.

Gabay uu leeyahay ninka la yiraahdo Xaaji Aadan Afqallooc, oo ka hadlayey wadajirkana, waxa ka mid ah:

Tawfiiqdu waa ururka oo laysku tiirsado e
Isu tegid tusaal waxa ku filan tuu aboor falaye
Taagtaad ku aragteen guryuu tahan bineeyaaye,
Ninna uguma tago oo qalcado tiiran buu galaye
Qudhaanyadu godad ay tahan qodday bay tacabka gey-

saaye

Taana waxay u dhigataa markay dhibi timaadaaye
Tamarku waa dedaal iyo kartiye maaha turug weyne
Nin laxaadku taam wada yahow taajir baad tahaye
Tagooggaagu waa hodan adigoon taagta maanicine
Adaan ruuxna taakulo ka sugin taada kula soo bax.

WIIL IYO GABADH

Wiil indha habeeno leh ayaa gabadh u haasaaye tegi jirey. Markaasay gabadhu indhaha ku caayi jirtey. Khaati buu ka joogsaday gabadha caydeedii ay indha la'aanta ku caayi jirtey. Maalintii dambe ayuu irbad geedkii ay fadhiisan jireen guntiisa ku muddey. Gabadhii buu soo raacay. Markay geedkii cabbar u soo jireen buu yiri, «Naa waa maxay irbadda geedka guntiisa ka dhalaashay?».

Gabadhii baa yaabtay oo istiri, «Illayn ninkan aad indha la'aanta ku caayeyso ee irbadda halkaas uga jeedda waa indha fayow yahay». Kolkaasay tiri, «Waar irbadee? Anigu waxba uma jeedo». Ku ye, «Naa waxba arki mayside soo soco».

Intuu gabadhii ka hor maray oo irbad uu meesha ku ogaa weeye e, isxariifshay, buu yiri, «Bal day hadda anigu sida aan irbadda u soo gooyo».

Siduu u sii habhab lahaa, ayuu intaanu geedkii gaadhin, awr halkan fadhiya dusha uga baxay, gob! Kolkaasaa gabadhii qosol la dhacday oo tiri, «Awr dhanna arki meysid, irbad geed ku taalna waad arkaysaa, miyaa?

MAAHMAAHO MURTI AH

1) Saddex madaxday dishaa:
Gar leexsan, gacan laaban iyo guddoon jilicsan.

2) Saddex faankoodu waa been:
Bakhayl, fuley iyo Beenaale.

3) Saddex saddex lama heshiiso:
Nin qosol badan iyo nin qoonsimaad badan
Nin qab weyn iyo nimaan u qabin
Nin quud jecel iyo niman u quudhin.

4) Saddex saddex bay ku baraan:
Baahidu ducadey ku bartaa,
Beentuna faankay ku bartaa,
Baryaduna fadhi bay ku bartaa.

5) Saddex lama derso:
Kaa doone kuu diida,
Kugu dire kaa diga,
Kula derse ku danqaaba.

6) Meel ama waa laga maqanaadaa
ama waa laga muuqdaa.
7) Saddex saddex kama dheregto:
Ili daymo kama dheregto,
Dhulna biyo kama dhergo,
Dhegina war kama dheregto.

8) Gaal dil gartiisana sii.

9) Wax rag kaa galay rako kaa gale.

10) Ninkii tiisa ba daryeelaa tu kale ku dara.

11) Nin kuu digey kuma dilin.

12) Saddex urur baa leh:

Caqli, ciidan iyo calaf.

13) Rag saddex baa ugu liita:

Ma toshe, ma tashiishe iyo ma tashade.

14) Adduunka waxa ugu daran:

Nimaad soortaan kaa socon iyo

Nimaad sugeysaan soo socon.

HALXIDHAALIHII GABADHA

Waxa la yiri laba nin ayaa gabadh la soo baxay. Gabadhana, labada nin mid baa la soo baxay, kan kalena waa ninka la wada. Waxa cidlada lagu soo jiraba markii la daalay, ayaa geed harkii la fadhiistay oo la nastay. Gabadhii ay wateen baa tiri, «Waar aynu nasanno».

Kii gabadha watay baa yiri, «Aga, waar naagtu ma waalan tahay! Oo waaba aynu fadhinaaye aan nasanno waa maxay? Ninkii jaalkii ahaa baa yiri, «Waar gabadhu waxay leedahay aan kabaha iska bixinno. Illayn caguhu waa daashan yihiin oo haddaynaan kabaha isak bixin daalku inaga bi'i maayo e».

Goortii cabbaar la socday ayey sidii oo kale waxay tiri, 'Inna afuriya». Ninkii watay baa yiri, «Oo maxaynu ku afurnaa illeyn wax ma wadanne e?» Kolkaasaa kii kaleeto yiri, «Waar waxay leedahay aan cadayanno. Maxaa yeelay, wax afka la geliyo aroortii cadaygaa ugu horreeya». Ninkii ragga ahaa ee qoftiisii dumarka ahayd la ballamayna wuxuu yiri, Afka iyo ilka rumayga mari oo indhaha kuulo».

Haddii cabbaar hore loo soo socday, oo meel la marayo, ayaa haddana gabadhii tiri, «Degmo ayaa inagu dhow». Ninkii gabadha la soo baxay baa yiri, «Oo gacalo annagga kaa dheer kaana horrayna, waxna uma jeedno e, maxaad araglay?» Kii kale ee gabadha la waday baa yiri, «Waxay leedahay waxaan arkaa xuunsho. Bal xuunsho meelahakan ka eegeeg». Sidii bay noqotay oo xuunsho ayey agtoodii ku arkeen. Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa, xuunsho ama rug joogtey ama raq joogtay ama rays joogtey.

Gabadhii markay aragtay in labada nin kala fariidsan yihiin, ayey kii la soo baxay diiddey oo waxay guursaday ninkii la soo bixiyey.

AFAR WARAABE

Afar waraabe ayaa isu yimid. Waanay kala raageen oo mud-do badan bay dhulkoodaas ku kala qadhaabanayeen. Mid baa kii kale waraystay oo yidhi. «Waar bal iska warran? Sidee baad ta-hay?». Wuxuu yidhi, «Ninyahaw ma nooliyo waa liitaa. Wixii aad orod igu ogeyd, waxba maanta kama joogaan. Alxamdu lillaahi hase ahaato e, dhal gammaan orodkaan kaga dhergaa». «Waxana la yidhi, dhasha gammaanka, fardaha dhashoodu, waa kuwa ugu dheereeya wax alla wixii afar lugood ku orda). Markaas waraaba-haasi markuu orodkiisii ka dayriyey, wuxuu yidh «Dhal gammaan orodkaan kaga dhergaa».

Kii labaad baa isna markaa wuxuu yidhi, «anna waxaad arag igu ogeyd, indho ma jiraan oo araggii waan ka liitaa. Hase ahaato e, Ilaahey mahaddiiye, habeen mugdi ah, cirkoo da'aya, tog biyo marayaan irbadda ku dhacda ayaan arki karaa».

Waraabihii saddexaad baa yidhi, «Anigu ilko ma hayo. Wax alla wixii aan hilbaha iyo lafaha iska jajabsan jirey, maanta ilko layguma oga. Hase ahaato e, Ilaahay mahaddiis, kuraankurta dameeraha waxaan indhaahdaa, «ma cad baa ma carjaw?» Ma kan baa ma kelli?.... (Waxa la yidhi, kuraankurta dameeruhu wax alla wixii la garaaco, iyadaa ugu adag).

Waraabihii afraad baa la yidhi, «Waar bal maqalkaagii ka warran? Sidee u dhego fayowdahay?». Wuxuu yidhi, «Maqal! Waagii hore meel dheer baan wax ka maqly jirey.

Haddana maqal ma jiro. Dhegihii waa i awdmeen! Hase ahaa-to e, Eebbe mahadi ha ka gaadho e, todoba tog oo biyo marayaan, kan u shisheeya sagaarada fadhida ayaan raabsigeeda maqlaa, 'Yakam, Yakam, Yakam', goortay leedhahay. Haddee maqal hal-kaasaan ka joogaa».